

# HAY'ADDA KU CAAWINTA IYO KU DAAWEYNTA GURYAHA

## MA U BAAHAN TAHAY CAAWINAAD XAGGA DAAWEYNTA AMA HOWLGURIYEEDKA?

Shaqaalo la soo tababaray ayaa ku daaweeyo kuna caawiyo guryahooda dadka jiro da walba' heyadaha ku caawinta

iyo ku daaweenta guryaha waxaa kale ay garabsiiyaan dadka ehelka ah ee dadkooda caawiyo.

## MAXEY QABTAAN HEYADHAHA KU CAAWINTA IYO KU DAAWEYNTA GURYAHA?

Hay'adahaas waxey u yimaadaan marka laga jiran yahay korka ama maskaxda, marka ay jiraan dhibaatooyin eykeentay waayeenimada, ama marka shil lagalo ama marka lagu dhibtoodo uurka.

Waxyaalaha ayqabtaan hay'adaha ku caawinta iyo ku daaweenta guryaha waxaa kamid ah:

### Daaweenta iyo ka howlgalitaanka gurigiina:

- Qiimeynta daaweenta aad u baahantihiiin
- La talin ku saabsan waxa la idiin qabankaro
- Ku caawin xagga nadaafada iyo daryeelka jirkaada
- Ku caawin xagga dhaqaaqa (kacitaanka seexashada)
- Diyaarinta iyo siismada daawooyinka
- Ka baaritaanka caafimaadka sida cabirka sokorta iyo dhiigkarka
- Ka daaweenta xanuunka
- Ka daaweenta dhaawacyada
- La joogitaanka nolosha dhamaadkeeda

### Ku caawinta howlgiruyeedka:

- Ku caawin waxsoo gadashada
- Cunto diyaarsiga
- Nadaafada guriga
- Dhar dhaqitaanka

### Deegaanada iyadoo ku xiran, hey'adaha ku caawinta iyo ku daaweenta guryaha ey qabtaan oo kale:

- Cunto ugu geyn guriga
- Gaadiidku qaaditaan iyo uraacitaan (dhaqtarka, adeega)
- Ijaaritaanka qalabka lakaashado (sida usha la cuskado, makiinada lagu neefsado kursiga lagu taraaraxo)



Howlaha kale sida daryeelka dadka waalan, daryeelka dadka kansarka qabo ama ka howlgalka dadka qabo jirooyinka aan daawada laheyn waxeyka sameeyaan gaar ahaan magaaloooyinka.

## MAXUU BIXINAA CEYMISKA CAAFIMAADKA?

Ceymiska caafimaadka qasabka ah wuxuu bixinaa howl uqabashada xagga daaweenta. Taasi, waa in uu heystaa warqad uu dhaqtarka ugu soo qoray ku daawenta guriga.

## MUXUU BIXINEYN CEYMISKA CAAFIMAADKA?

Ku caawinta howlguriyeedka mabixinaayo ceymiska caafimaadka.

Waxaa suurtoagal ah in lala galo ceymis dheeri ah ceymisyaal badan. Kawardoono ceymiskaaga.

Hadii aad qaadatid lacagta loogu dhameystiro tan waayeelada iyo curiyaanada, Degmada ayaa inta badan bixiso qeyb kamid ah qarashka ku caawinta howlguriyeedka.

## MUXUU BIXINAA QOFKA LA CAAWIYAY?

- Ilaa xadka sanadkiiba uu kula heshiiyay ceymiska caafimaadka
- 10% qarashka ku baxay daaweenta (ka qeybgalka)
- Ka qeybqaadashada bukaanka qarashka daawenta (ugu badnaan CHF 15.35 maalintii, waxey ku xirantahay gobolka aad degantahay)
- Qarashka ku caawinta howlguriyeedka

### Karaadsada warbixin:

- [www.aides-soins-domicile.ch](http://www.aides-soins-domicile.ch)  
→ deegaankiina
  - 0842 80 40 20 (8 santi/daqiiqadiiba)
  - Maamulka degmada aad degantihiin
- Anagoo ka helno caawinaad farsamo iyo dhaqaale migesplus.**

Waxaa malgeliyey migesplus

Schweizerisches Rotes Kreuz  
migesplus.ch

[www.migesplus.ch](http://www.migesplus.ch) – Ogeysisyo ku sabsan xaga  
Cafimaadka oo luqado kala duwan ku soo baxa



Überall für alle

**SPITEX**  
Schweiz